



Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

WAR-SAXAAFADEED 024/2009

Ergayga Gaarka ah ee Xoghaya Guud oo soo dhoweeyay siidayntii dadkii lagu haystay waddanka iyo asaga oo ku baaqay in la sii daayo kuwa harsan

Nairobi, 12 Agoosto 2009 - Ergayga gaarka ah ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya Ahmedou Ould-Abdallah ayaa maanta soo dhoweeyey sii deysmada la siidaayey 4 ka tirsanaa shaqaalaha Hay'ada Samafalka iyo Labo (2) Duuliye kuwaasoo afduub loogu haystay Soomaaliya.

“Si aad iyo aad farsad u leh ayaan u soo dhoweeyey warka ku saabsanaa sii deysmada 6 qof oo in muddo ahaydba dalka lagu haystay kuwaasoo lagu afduubtay Soomaaliya ayagoo u shaqeynaaya hay'ada samafalka ah ee la yiraahdo ACTION AGAINST HUNGER (La dagaalanka Gaajada)” ayuu yiri Mudane Ahmedou Ould-Abdallah“ waxaan soo dhaweynayaa dulqaadka iyo geesinada ay u yeesheen dhibka ku muteysteen arimahani maskax ahaan iyo jir ahaanba, waxaa kale oo aan ku faraxsanahay in ay ugu dambeyntii dhamaatay walacii iyo walbahaarkii hastay eheladoodii”

“ Si kasta oo ay arintu ahaataba, ma iloowayno dadka isugu jira Soomaali iyo Ajaaniib ee weli ku jira gacanta Afdubayaasha kuwaasoo ku sugan xaalado aan la ogolaan Karin, ficilkaas oo mudan in ay cambaareeyaan gebi ahaamba Soomaalida iyo Bulshada Caalamkaba” Ayuu yiri Ould-Abdallah.

“ Waxaan Baaq u jeedinayaa dhamaan dadka Soomaaliyeed ee si kastaba gacan ka geysan uga geysan kara soo sii deysmada kuwa weli ku haray Xabsiga afduubayaasha inay talaabo qaadaan” ayuu yiri Mudane Ould-Abdallah “ Talaabadan looma samaynaayo oo keliya inay tahay talaabo wanaagsan oo la qaadayo darteed ee laakiin waxay wax ka taraysaa soo celinta magaca Soomaaliyeed iyo sharaftiisa waxayna u diidaysaa ummadda Soomaaliyeed in magacooda lala xiriiriyo dad Afdubista foosha xun.

“Maadaama bishii Soon ay soo dhawaatay waxaan rajaynayaa Baaqayga la yeeli doono, arinta aan codsadayna la samayn doono” Ayuu yiri Ould-Abdallah.